

Soo dhowow

Somali

Ku soo dhowow Bogga Internet-ka ee Sutton Housing Partnership.

Sutton Housing Partnership waa shirkadda maamusha guryaha ay leedahay Degmada Sutton ee London.

Ujeedada boggayaga internet-ka waa in aanu bixino warbixino wakhtiga la socda, oo ku saabsan adeegyadayada guryaha, wararka iyo hawlaha/munaasabadaha degmada, si aanu si ka sii fiican wada-xidhiidh ula samayno dadka hantiyahayaga ku nool.

Degmada Sutton waxaa lagaga hadlaa luuqado badan, mana awoodno inaanu turjuno boggan internet-ka ama dhamaan waxyaabaha aanu daabacno. Laakiin waxaanu doonaynaa inaanu dadka hantiyahayaga ku nool ka caawino inay fahmaan adeegyada ay heli karaan.

Waxaanu dadka hantiyaha naga kiraystay siin doonaa turjumaad af-celin ah iyo mid qoraal ah marka aanu u baahanahay inaanu siino ama aanu ka helo warbixin muhiim ah oo ku saabsan gurigaaga ama adeegyada guryaha.

Waxaanu sidoo kale bixinaa bog/sanduuq turjumaad qoraal ah la socda dhamaan waxyaabaha aanu daabacno, oo sharaxaya waxa ay daabacaadu tahay iyo sida aad u heli karto turjumaad qoraal ah oo dukumeentiga laguugu sameeyo.

Dhamaan Waaxaha iyo Xafiisyada Dhismayaasha degsiimo (Estate Offices) ee Sutton Housing Partnership waxay dariiq u leeyihiin inay helaan:

turjumaad telefoonka ah
turjumaad weji-ka-weji ah
adeegyo turjumaad qoraal ah

Ama haddii aad doonayso, qof weyn oo qoyska ah ama saaxiib ayaa ku caawin kara.

Haddii aad doonayso inaad dariiq u hesho mid kasta oo ka mid ah adeegyadaas, fadlan wac telefoonkayaga bilaa lacagta ah ee lambarkiisu yahay 0800 195 5552.